



HORDHACA BARNAAMIJKA

Waxaan aad ugu faraxsannahay in aan baahinno caddadkii 3-aad ee taxanaha Wargeliyaha barnaamijka Daadihiye ee Talagelinta Bulshada ee magaalada Muqdisho. Caddadkan, Daadihiye waxa uu u kuurgalay kaalinta muwaaddinka uu ku leeyahay hannaanka dawladdnimada. Muwaaddiniintii aan la xiriirnay waxaay iftiimiyeen dhinacyada ay is leeyihiin in dawladdu ay ku maalgeliso canshuuraha laga soo ururiyo dadka. Natiijooyinka soo baxay waxa ay na siinayaan casharro qiimo leh oo siyaasad-dejiyeyaasha iyo hawlwadeennaduba u adeegsan karaan sidii loo dhisi lahaa bulsho xooggan oo loo dhan yahay iyada oo loo marayo bixinta adeegyo wax ku ool ah.

Waxaad booqan kartaa boggeena www.daadihiye.com si aad isu diiwangeliso oo aad ula socoto warbixinnada cusub. Waxaan had iyo jeer soo dhawaynaynaa jawaab-celin walba oo ka timaadda dadweynaha iyo siyaasad-dejiyeyaasha. Haddii ay jiraan waxyaabo aad rabtid in aad nala wadaagto, waxaad noogu soo diri kartaa daadihiye@raagsan.com.

Ifafaale Wacan,

Badra Yuusuf

Maamulaha Shirkadda Raagsan

IN LOO ADEEGSADO HANTIDA
DADWEYNAHA BIXINTA ADEEGYADA
MUHIIMKA AH - WAA AASAASKA
KASBASHADA KALSOONIDA SHACABKA
IYO KORDHINTA DAKHLIGA

"Waxaan bixinnaa canshuur, dawladdana waxaan ka filaynaa in ay horumariso amniga, ayna bixiso adeegyada muhiimka ah sida waxbarasho tayo leh iyo daryeel caafimaad, shaqo boolis oo waxgal ah iyo jidad hagaagsan" Dadka Deggan Muqdisho.

SIDEE AYAAN ULA XIRIIRNAA BULSHADA?



Sahan Cilmibaaris



Barnaamij Idaacad



Wicitaanka Dadweynaha



Madal Dadweyne



Wadahadal Lala Yeelanayo Siyaasad-
Dejiyeyaasha



Mareegta Isla-falgalka Online-ka

NATIJOOYINKA SAHANKA


NUXURKA NATIJOOYINKA UGU MUHIIMSAN

Wargeliyahan, waxaan ku eegeynaa, kuna diiwaangelinaynaa waxyaabaha ay dadka Muqdisho ka filayaan dawladda marka laga fiiriyo dhinacyada bixinta adeegyada iyo sida dawladdu u horumarin karto helidda iyo tayada adeegyada. Halkan ka akhri natiijoyinkii aan helnay oo kooban.


Muwaaddiniintu waxa ay kaalin mug leh ku leeyihiin hannaanka dawladdnimada iyaga oo gudanaya waajibaadkooda ku aaddan horumarinta bulshadooda. Halkan waxaa si kooban ugu xusan siyaabaha ay dadka Muqdisho u dareemayaan in ay wax ugu biirin karaan hannaanka dawladdnimada.



Dulmar kooban: Kaalinta muwaaddiniintu ku leeyihiin hannaanka dawladdnimada



DADWEYNUHU MAXAY KA FILAYAAN DAWLADDA?



Sidoo kale, waxaan diiwaangelinnay isdhexgalka dawladda iyo muwaaddiniinta ee la xiriira bixinta adeegyada. Halkan waxaa si kooban ugu xusan adeegyada aasaasiga ah ee dadku ka filayo in ka helaan dawladda iyo hay'adaha la jaalka ah.

DADKA AAN IS MAQALNAY




**17
DEGMO**


**2609
JAWAAB-BIXIYE**

Inta xog-ururintu socotay, waxaan waraysannay 2609 qof oo deggan Muqdisho, oo 1340 ay rag tahay, halka 1269 ay haween yihiin.


XOGTA DADKA



Shax 1: Jinsiga Jawaab-bixiyeyaasha



Shax 2: Da'da Jawaab-bixiyeyaasha



Shax 3: Xaaladda Jawaab-bixiyeyaasha

KAALINTA DADWEYNAHA EE HANNAANKA DAWLADNIMADA

Muwaaddiniintu waxa ay kaalin muhiim ah ka qaataan hannaanka dawladdnimada ee dal walba. Ka qeybqaadashada muwaaddiniinta ee habraaca dawladdnimada waxa ay aasaas u tahay xoojinta daahfurnaanta, bixinta adeeg wax-ku-ool ah iyo islaxisaabtanka dawladda. Muwaaddiniintu waxa ay khibrado iyo talooyin kala duwan ku biiriyaan hannaanka go'aan gaarista, iyaga oo dawladda kula xisaabtama hawlaha ay qabato. In la garawsado, lana qiimeeyo waxyaabaha ay muwaaddiniintu ku biirin karaan dawladdnimada waxa ay saldhig u tahay dhimsaha nidaam bulsho oo loo dhan yahay oo horumarsan. Tani oo xoojisa kalsoonida iyo sharciyadda ee u dhaxaysa dadka iyo dawladdooda, taas oo sii dhiirrigelinaysa dawladdnimo wax-ku-ool ah.

Waxaan waraysannay dad badan oo aan weydiinnay kaalinta ay ku yeelan karaan hannaanka dawladdnimada. Bixinta canshuuraha, in dawladda lagu taageero ajandayaasheeda sharci-dejin iyo horumarineed, u hoggaansamidda shuruucda iyo xeerarka dalka, caawinta bulshada inteeda danyarta ah, ka qeybqaadashada nadaafadda iyo dhowridda degaanka, taageeridda dadaallada dib-udhiska ah, iyo ka qeybqaadashada hawlaha kale ee ay dawladda hormuudka u tahay ayaa ah hababka ay sheegeen in muwaaddiniintu ku muujin karaan in ay ka go'an tahay caawinta dadkooda si loo helo bulsho barwaaqaysan oo caddaalad ku dhisan.

DHISIDDA XIRIIR WANAAGSAN OO U DHEXEYTA DAWLADDA IYO MUWAADDINIINTA IYADA OO LOO MARAYO BIXINTA ADEEG TAYO LEH

In ay dawladdu bixiso adeegyo tayo leh oo ay helaan muwaaddiniinta waxa ay aasaas u tahay in la abuurto kalsooni, lana joogteeyo xiriir wanaagsan oo dhex mara labada dhinac. Soomaaliya, adeegyada badankood waxaa bixiya hay'adaha gaarka loo leeyahay, iyada oo ay aad u yar yihiin adeegyada ay dawladdu bixiso ama qeybta ka tahay. Hase ahaatee, arrintani waxa ay dawladda fursad u siinaysaa in la timaaddo dadaal dheeraad ah oo ay ku gudato waajibbaadkeeda ku aaddan hubinta in muwaaddiniintu ay helaan adeegyo tayo leh.

Waxaan ka waraysannay dadka deggan Muqdisho siyaabaha ay dawadda Soomaaliya u horumarin karto helidda adeegyada ay u baahan yihiin bulshooyinka. Waraysiyadaasi waxaa nooga soo baxay fahan iyo aragti billow fiican u noqonaya sidii dawladdu u qaadi lahayd tallaabooyin la taaban karo oo lagu horumarinayo nolosha muwaaddiniinta. Iyada oo maalgelin ku samaynaysa bixinta adeegyo hufan oo tayo leh, dawaddu waxa ay dhidibbada u aasi kartaa xiriir xooggan oo firfircoon, oo ku salaysan ixtiraam iyo kalsooni.

"Muwaaddiniintu waa in ay la shaqeyaan dawladda si loo yareeyo caqabadaha bulshada."

– Barakace (lab), Hawlwadaag

"Kaalinta muwaaddinku waa in uu qayb ka noqdaa dawladd wanaagga iyo dhismaha dawladda." – Barakace (dheddig), Boondheere

"Muwaaddiniintu waa in ay u hoggaansamaan shuruucda federaalka iyo xeerarka si dalku u xasilo." – Barakace (dheddig), Dharkeenley

"Muwaaddiniintu waa in bixiyaan canshuuraha si ay uga qeyb qaataan horumarinta hannaanka dawladdnimada." – Muhaajir dhaqaale (dheddig), Waabari

"Muwaaddiniintu waa in ay la shaqeyaan dawladda si loo xoojiyo iskaashiga dawladda iyo dadweynaha." – Muwaaddin (lab), Hawlwadaag

"Muwaaddiniintu waxa ay u ololayn karaan ilaalinta degaanka." – Muwaaddin (lab), Deyniile



01

Bixinta adeegyo tayo leh oo ka jawaabaya baahida bulshada

In kasta oo adeegyo laga helo Muqdisho, haddana dadku waxay tilmaamayaan in adeegyadaasi ay aad qaali u yihiin, tayadooduna ay liidato. Waxayna carrabka ku adkeeyeen muhiimadda ay leedahay in dawladdu ay hagaajiso oo ay kormeerto tayada iyo sicirka adeegyada la siiyo bulshada.

“Dawladdu waa in ay horumarisaa adeegyada iyadoo xakameynaysa tayada adeegyada la bixiyo.” – Muwaaddin (Lab), Kaaraan.

“Marka hore dawlada hoose waa in ay siisaa bulshada adeegyada ay rabaan, kana fikirtaa tayadooda sida waxbarashada iyo caafimaadka, si kor loogu qaado tayada noloshooda.” – Muwaaddin (Lab), Hodan.

“Dawladda iyo ganacsatadu waxay yeeshaan shir lagu xakameynayo tayada badeecada iyo gaarsiinta adeegyada ee goob kasta.” – Muwaaddin (dheddig), Warta Nabadda.

02

Dhiirrigelinta hannaan loo dhan yahay oo ku dhisan islaxisaabtan iyo daahfurnaan

Waa in dawladda lagula xisaabtamo cashuuraha laga qaado muwaaddiniinta oo ay si dhow ula shaqeyso ganacsatada iyada oo soo saaraysa sharciyo, si adeegyadu u noqdaan kuwo la iibsano karo lana heli karo, taasoo loo marayo iskaashi dhex mara dawladda iyo ganacsatada oo ku dhisan canshuur dhimis, si kor loogu qaado tayada adeegyada bulshada la siinayo.

“Dawladdu waa in ay la dirirtaa musuqmaasuqa xad dhaafka ah iyo caddaalad darrada bulshada si kor loogu qaado adeegyada aasaasiga ah.” – Muwaaddin (Lab), Hodan.

“Dawladdu waa in ay yaraysaa heerka musuqmaasuqa si loo belo dhaqaale lagu horumariyo adeeg bixinta.” – Muwaaddin (dheddig), Cabdicasiis.

“In la abuuro xafiis rasmi ah oo koontaroolaya tayada adeegyada korna u qaadaya islaxisaabtanka iyadoo lala tacaalayo musuqmaasuqa.” – Qaxooti (dheddig), Hodan

03

Samaynta golayaal sahlaya la falgelidda muwaaddiniinta

Waxaa loo baahan yahay in la sameeyo habab ay dadku dawladda ku soo gaarsiin karaan aragtidooda iyo caqabadaha ay wajahayaan. Sidoo kale, dawladda waxaa laga filayaa in ay u oggolaato bulshada in ay si xor ah u muujiyaan tabashooyinkooda. Marka muwaaddiniinta wax laga talageliyo, dawladdu waxay si fiican u fahmi kartaa baahiyahooda iyo tabashooyinkooda, taas oo wax ka tari karta hawlaha siyaasad-dejinta iyo hagaajinta adeegyada.

“Haddii dhammaan daneeyayaasha iyo siyaasad-dejiyeyaasha ay ka wada hadlaan waxqabadkooda si ku dhisan aragtida bulshada, waxaan gaari doonnaa adeeg bixin horumarsan maadaama dhammaan adeegyadu ay ku saleysnaan doonaan mudnaanta bulshada.” – Muhaajir dhaqaale (lab), Hawlwadaag.

“Haddii dawladdu soo farageliso oo ay dadka kala tashato waxay rabaan, waxaa hormaraya oo hagaagaya adeegyada. Helitaanka adeegyo tayo leh waxay ku xiran tahay sida ay dawladdu ula falgasho shacabka, taasoo abuuraysa kalsoonida lagu qabo dawladda.” – Muwaaddin (dheddig), Kaaraan.

“Dawladdu waa in ay dadweynaha u qabataa shir guud oo lagaga tashanayo waxa ay bulshadu rabto; markaas waxaa u fududaan doonta dawladda horumarinta adeegyada aasaasiga ah.” – Muwaaddin (dheddig), Kaxda.

“Dawladdu waa in ay marka hore shirar noo qabataa oo aan kaga hadalnaa baahiyabeenna.” – Barakace (dheddig), Garas-Baaleey.

04

Horumarinta caddaalad la wada heli karo

Dawladdu waxa ay u baahan tahay in ay dhexdhexaad ka ahaato adeeg bixinteeda oo ay hubiso in qeybaha bulshada ee danyarta ah mudnaan la siiyo, marka ay adeeg bixin joogto.

“Adeegyada waa in la gaarsiiyaa dhammaan dadweynaha si eex la'aan ah.” – Muwaaddin (dheddig), Hiliwaa.

“Dawladda hoose waa in ay sinnaan iyo caddaalad ugu adeegtaa bulshadeeda.” – Muwaaddin (lab), Boondheere.

“Dawladdu waa in ay horumarisaa adeegyada iyada oo adeegyada si caddaalad ah dadka ugu qoondaynaysa.” – Barakace (lab), Xamarweyne

05

Iswaafajinta qiimaha lacagta iyo adeegga lagu beddelanayo

Dawladdu waa in ay hubisaa in muwaaddiniintu ay dareemaan in ay ku qanacsan yihiin adeegyada la siiyo oo ay lacagta dhaafsadaan.

“Dawladdu waa in ay la timaaddaa qorshe ay ku bixinayso adeegyada bulshada ee lagama maarmaanka ah, sababtoo ah dadku waxay bixiyaan cashuur; waa in ay helaan adeegyada ay u baahan yihiin, sida daryeelka caafimaadka iyo waxbarashada.” – Muwaaddin (lab), Deyniile.

“Dawladdu waxay ka faa’iidaysan kartaa cashuuraha ay dadka ka qaaddo, taa beddelkeedana waxay ku bixin kartaa adeegyada ay bulshadu u baahan tahay.” – Muwaaddin (dheddig), Kaaraan.

WAXA AY MUWAADDINIINTU DAWLADDA KA FILAYAAN

ISLAFALGALKA DAWLADDA IYO MUWAADDINKA: FILASHADA DADWEYNAHA IYO SABABTA AY MUHIIMKA U TAHAY

Fahanka waxa ay muwaaddiniintu ka filayaan dawladda iyo siyaasad-dejiyeyaasha waxay suurtagelinaysaa qaadashada go’aan waxtar leh. Waxa kale oo ay gacan ka geysataa kobcinta xidhiidh togan oo u dhexeeya dawladda iyo muwaaddiniinteeda, maaddaama ay bulshadu aad ugu dhowdahay in ay aaminaan oo ay taageeraan dawlad ay u arkaan in ay wax ka qabanayso baahiyahooda.

Si loo helo fahan qoto dheer oo ku saabsan filashooyinkaas, jawaab-bixiyeyaasha ayaa la waydiiyay waxa ay ka filayaan dawladda. Inta badan muwaaddiniintu waxay sheegeen in ay filayaan in dawladdu ay bixiso adeegyo kala duwan oo muhiim ah sida amniga, waxbarashada, caafimaadka, abuuridda fursado shaqo, dhisidda waddooyinka iyo kaabayaasha kale, iyo sare u qaadidda marin-u-helidda caddaaladda.

Natiijooyinkani waxay muujinayaan doorka muhiimka ah ee ay dawladdu ku leedahay nolasha muwaaddiniinteeda iyo rajada sare ee ay muwaaddiniintu ka qabaan dawladdooda. Iyadoo la fahansan yahay rajada muwaaddiniinteeda, dawladda iyo siyaasad-dejiyayaashu waxay ka shaqayn karaan in ay ka miradhaliyaan rajooyinkan si loo dhiso bulshooyin xooggan oo siman.

Shaqo abuur

“Dadka degaankaygu waxay dawladda ka rabaan in ay dhallinyarada wax baratay shaqo u abuurto.” – Muwaaddin (lab), Xamar Jajab.

Amni

“Dawladda waxaan ka filaynaa in dalka ay amni ku soo dabbaasho, si dadku ay xorriyad ugu noolaadaan.” – Qaxooti (dheddig), Xamarweyne.

Waxbarasho

“Dawladda waxaan ka filaynaa in ay horumariso manhajka waxbarashada.” – Muwaaddin (lab), Xamar Jajab

“In ay horumariso tayada tacliinta.” – Muwaaddin (lab), Wadajir.

“Bulshadu waxay filaysaa in dawladdu ay dadka siiso tacliin bilaash ah” – Barakace (dheddig), Garas-Baalley.

Dhisidda jidad iyo kaabayaasha kale

“Dawladdu waa in ay noo dhistaa jidad, biyaxireenno, iyo hannaanka maareynta bullaacadaha.” – Muwaaddin (dheddig).

Daryeel Caafimaad

“In xarumo xaafimaad laga dhiso degmooyinka.” – Muhaajir dhaqaale, Kaxda

“In la horumariyo adeeg caafimaad oo tayo sare leh.” – Muwaaddin (lab), Hodan.

Xoojinta marin-u-helidda caddaaladda

“In la abuurto hannaan garsoor oo bulshada si caddaalad ah ugu adeega.” – Muwaaddin (dheddig), Hodan.

Guriyeyn

“Dawladda waxaan ka filaynaa in ay dhinto deymaha guryaha (muraabaxo) lagu qaato ee qaaliga ah.” – Muwaaddin (lab) qax ka soo laabtay, Hawlwadaag.

CADDADKA SOO SOCDA

Caddadkeenna xiga ee Maarso, Daadihiye wuxuu qaadaadhigi doonaa bixinta adeegyada asaasiga ah iyada oo laga fiirinayo dhinacyada sicirka, helidda iyo tayada adeegyada. Falanqayntan qotada dheer waxay diiradda saaraysaa xaaladda adeegyadaas asaasiga ah iyo iftiiminta dhinacyada laga horumarin karo.

SI AAD XOG DHEERI AH U HESHO, FADLAN BOOQO
www.daadihiye.com
www.daadihiye.so

Nagal soo xiriir:
daadihiye@raagsan.com

Nagala soco:



Soo wac

